

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA

REPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF ENERGY AND MINERALS



XOG-SIDE

01 MACDANTA



02 TAMARTA



03 SHIDAALKA





XOG-SIDE

Weedha Agaasimaha Guud	4
Weedha Wasiir Ku Xigeenka	5
Shirka Isku-Xidhka Aaggaga Tamarta, Shidaalka Iyo Macdanta	6
Daahfurka Qorshaha Istaraatajiyadda Shanta Sano Ee Wasaarada Macdanta Iyo Tamarta Somaliland	9
Wasaarada Macdanta Iyo Tamarta Somaliland Oo Madal Ku Shaacisay	
Dhaqangalinta Siyaasada Macdanta	11
Kulanka Xog-Kaydinta Liisamadda.	13
Dib U Eegista Waajibaadka Shaqo Ee Komishanka Tamarta	14
Wasiirka Oo Kalmad Dhiiri Gelin Ah Ka Jeediyey Book Fairka Hargaysa	15
Kulanka Ibo-Furka Iskaashiga Somaliland Iyo Denmark Tamarta iyo Macdanta	16
Kulanka Agaasimaha Guud Iyo Daneyayaasha Tamarta Hargeysa	17
Mashruuca Dib-U-Habeynta Macdan Qodayaasha Yar Yar	18
Wasiir Ku Xigeenka Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta Ayaa Kulan Wacyi-Gelinta Ka Daah-Furay Magaladda Ceerigaabo	19
Daba-Galka Adeegyada Caafimaad Ee Loo Fidiyey Bulshada Ku Dhaqan Gobollada Saraar Iyo Togdheer.	20
Kulanka Lafo-Gurka Xeer-Nidaamiyaha Ruqsadaha Iyo Tacriifada Korantada	21
Kooxda Piu-Da Iyo Agaasimaha Guud Oo Ka Warbixiyey Mashruuca Sesrp	22
Wasiir Ku-Xigeenka Wasaaradda Oo Qaabiley Wefti Maalgashadeyaal Ah Oo Ka Socda Shirkadda Kilomass	23

Dardar Gelinta Mashruuca Baanka Aduunka	24
Koox Kamida Shaqaalaha Wasaaradda Oo Tababar Kaga Qaybgalay aiwan Iyo Booqashadii Wasiirka Ee Dalkaas	25
Shirka Shaqaalaha Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta	27
Shirkii Agaasimaha Guud Iyo Agaasimayaasha Waaxaha	28
Kulanka Wada-Tashiga Tamarta La Cusboonaysiiyo	29
Guddida Dhaqaalaha Ee Golaha Wasiirrada Oo Bogaadiyey Horumarinta Aagga Tamarta	30
Agaasimeyaal Ka Tirsan Wasaaradda Oo Kulan La Yeeshay Ardayda Jaamacadda Golis	31
Wefti Ka Socda Shirkad Sweden Laga Leeyahay Oo Booqasho Xaqiiqo-Raadin Ah Ku Yimi Dalka	32
Wasiirka Tamarta Iyo Macdanta Oo Imaaraadka Carabta Kula Kulmay Maalgashadeyaal	33
Wefti Ka Socda Shirkadda Pioneers Trade Center Oo Booqasho u Yimi Dalka	34
Wasaaradda Oo Turjumaysa Shan Xeer-Nidaamiye La Xidhiidha Shidaalka	35
Fiqi Ayuub	36
Agab Wax Barasho	37
Turjumaadda Xeernidaamiyayaasha Macdanta Somaliland.	38
Xaflada Abaalmarinta Shaqaalaha Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta si Ee Sanadkii 2023	39
Guddida Maamul (Steering Committee)	42
Wefti Ka Socda Koonfur Afrika Oo U Kuur-Galay Tamarta Iyo Khayraadka Somaliland	43
Soo Dhawaynta Agaasimaha Guud	44
Dib U Eegista Qorshe Sanadeedka 2023 Ee Wasaaradda	45
Agaasimaha Guud Ayaa Soo Xidhay Shirka Diyaarinta Qorshaha Sanadka 2024	46
Safarkii Uganda	47

WEEDHA WASIIR KU XIGEENKA



Wasiir ku xigeenka Tamarta iyo Macdanta Md Siciid Axmed Jibriil Jibriil ayaa shaqaalaha Wasaaradda Tamarta & Macdanta u sheegay in Waaxyahii Qaranka horumarkiisu ku xidhnaa masuul ka yihiin, waxaanu yidhi,

“Waaxyaha Macdanta, Batroolka iyo Tamarta waa kuwa halbowlaha u ah horumarka wadan walba. Hadii aan Tamar jirin waxba lama samayn karo, warshad lama abuuri karo, wax-soo-saar lama heli karo, Biyo la heli maayo. Nolosha Bulshadeena inta badani waxay ku xidhan tahay in helo Tamar Jaban, la Aboodi karo, La isku halayn karana.

Halbowlayaashii horumarka wadanka Wasaaradda ayaa masuul ka ah, waa inaan gudanaa waajibaadkeena” Bulshadeenana ugu Adeegnaa Daacadnimo iyo in shaqadda Wakhti baddan aynu ku bixino.

Md. Siciid ayaa hawl-wadeenada wasaaradda kula dardaarmay inay ku dedaalaan barashada aqoonta, taasoo helitaankeeda wax walba fure u ah.

“Aqoon markaad hesho waa laguu baahan yahay, laakiin waa inay la socotaa hufnaan, iyo anshax wanaag.”

Siciid Axmed Jibriil

**Wasiir ku Xigeenka Tamarta
iyo Macdanta**

WEEDHA AGAASIMAHA GUUD



Hiigsigga wasaaradda Tamarta iyo Macdantu waa in ay gacan laxaad le ka gaysato koboca dhaqan-dhaqaale ee bulshada soomalilaan, iyadoo loo marayo in si waarta looga faaidaysto khayraadka dalka macdanta, Tamarta iyo shidaalka.

Wasaaradda Tamarta iyo macdantu waxay ka shaqaysaa, dajinta, Hagidda iyo hir galinta Himiladda dawladda somalilaan ee la xidhiidha Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka, Iyada oo loo marayo dajinta iyo fullinta siyaasadaha istiraatiijiyadaha iyo mashariicda fududaynaya in laga midha dhaliyo hamsami u adeegsiga khayraadkaasi, iyadoo lala kaashanayo qaybaha kala duwan ee xukuumadda iyo daneeyayaasha kale ee tamarta macdanta iyo shidaalka.

Sidaa darteed soomalilaan waxay aasaastay isla markaana qorshaysay daah furnaan ku haboon soo jiidashada maal gashadayaal iyo daneeyayaasha horumarineed, hanaanka geedi socodka safarkani wuxuu saamayn ku yeelan donnaa helitaanka kaydodka macdaneed ee baaxada weyn iyo tamar jaban, oo inagu filan, lana Aboodi karo.

Maxamed Cismaan Siciid

**Agaasimaha Guud ee
Wasaaradda Tamarta
iyo Macdanta**

SHIRKA ISKU-XIDHKA AAGGAGA TAMARTA, SHIDAALKA IYO MACDANTA



Madaxweyne ku-xigeenka Jamhuuriyada Somaliland oo ay weheliyaan Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Wasiirka Qorshaynta Qaranka Wasiir Ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa Daah furay Kulanka Isku-xidhka Aaga Tamarta, Shidaalka iyo Macdanta Somaliland, kaasoo ka qabsoomay Magaalada Hargeysa 23/6/2024, socdayna ilaa iyo 24/06/2024.

Shirkan oo ay soo qaban qaabisay wasaaradda Macdanta iyo Tamarta Somaliland isla markaana ay ka qayb galeen xubno ka tirsan golaha wasiiradda madaxda wasaaradda oo qaban qaabisay iyo daneeyeyaasha Macdanta iyo tamarta iyo shidaalka Somaliland ayuu si rasmi ah u furay Madaxweyne ku xigeenka Somaliland Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil Saylici

Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cismaan Siciid oo ka hadlay ujeedada kulanka iyo waxtarkiisa ayaa yidhi. “kulankan oo ah aagga wadaageyaasha Tamarta macdanta iyo shidaalka oo ah waxyaahaba ay wasaaraddu u aasaasan tahay, ujeedada ugu wayn ee kulanku waxa weyi in daneeyeyaasha aagga tamarta, macdanta iyo shidaalka lagu wadaago wixii xog ah.”

Xubno kamida Golaha Wasiirrada xukuumadda Somaliland oo xaflada furitaanka ka hadlay ayaa tilmaamay in shirkani muhiimad weyn u leeyahay Dalka, abuurayana jawi isku-xidh oo midaynaya maalgashadeyaal kala duwan.

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax Cabdi ayaa idhi “saddexda qaybood ee Wasaaraddu ka kooban



tahay (Macdanta, Tamarta iyo Shidaal) iyo daneeyayaasha nagu xidhan marba waanu shirnaa oo waxaanu ka wada tashanaa wixii nagu soo kordha, caqabadaha naga horyimi iyo waxyaaba noo soo socda iyo wixii noo yaalla, shirkanina kulamadaas wada-tashi waa kamid uun” sidaas ayuu yidhi Wasiirka Wasaaradda macdanta iyo tamarta Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi munaasibada furitaanka shirka hadal ka jeediyey “maanta oo bilow ah waxaanu gaar uga dhignay tamarta, waayo Tamartu waa ruuxda horumarka dalkeenu u baahan yahay. Shaqo ka maaranta tamartu ma jirto, marka kaabeyaasha Waddanka la doonayo in la horumariyo waa in tamarta loogu horaysiiyaa”ayuu raaciyey hadalkiisa Wasiirku.

Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi waxa uu sheegay in horumarinta Tamarta dalku meel fiican marayso hadda, waxaanu si weyn ugu mahad naqay Shirkaddaha Koranta bixiya oo ku amaanay deddaalka ay waddanka ku gaadhsiiyeen adeegooda “waxaan ogahay halka ay shirkaddaha Laydhku ka soo kexeeyeen adeegyadooda”- “waddankan oo faynuus la shito ayaan joogay, iyadoo mishiin yari dukaamada horyaalla Ayaan joogay, maantana halka uu marayo waa la ogyahay, laakiinse in la sii horumariyo ayuu u baahan yahay, maantanna sidii ugu fiicnayd ayaanu uga wada shaqaynaynaa shirkaddaha, waxaana muuqata inay guul weyni soo dhawdahay oo aanu dariiq wanaagsan hayno. Waxa kale oo aan idiin sheegayaa kharashkaas ku baxaya tamarta waxa innaga caawinaya Baanka adduunka, iyadoo aan amaah ahayn, taana inaynu ka faa’idaysano weeye”



Madaxweye ku xigeenka oo ka hadlayay muhiimadda ay leedahay ka shaqaynta danta guud iyo qarannimadu waxaa uu yidhi. “haddii ay danta guud hagaagto qof walba na tiisa gaarka ahi way u hagaagaysaa, haddii aynu tamar jaban helno qof walba gurigiisa ayay ugu tegaysaa, Maanta warshadeheenii la sameeyay boqolkiiba konton way fadhiyaan, waxaanay u fadhiyaan waa Tamar la’aan. mar kastana waxaynu ku horumaraynaa sida aynu tamarta uga shaqaysiino maanta kamaynaan baxneen haddii aanay jirin tamarta la cusboonaysiiyay.

Waayo shidaalkii oo intaan ka qaylinaynay ka badan ayuu sii kacay, cid kasta oo dalka maalgashanaysana waan soo dhawaynaynaa.” ayuu yidhi Madaxweyne ku xigeenka Somaliland Mudane Cabdiraxmaan Cabdilaahi Ismaaciil Saylici.



Wasiirka wasaaradda qorsheynta Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland Md. Axmed Maxamed Diiriye (Toorno) oo munaasibada ka hadlay ayaa bogaadiyey kulanka iyo qodobadaba ajandaha looga dhigay.





Kulanka ayaa intii uu socday waxa si qoto-dheer loogu lafo-guray sidii loo mideyn lahaa Aagagga Tamarta, Shidaalka iyo Macdanta ee Jamhuuriyadda Somaliland, kuwaasoo ay maamusho Wasaaraddu, iyaddoo ay ka qaybgaleyaaashu si mug leh u beyaamiyeen ahmiyadda ay qaranka u leeyihiin saddexda qayboodba.

Dooddaha madasha laga jeediyey waxa kale oo ka qayb-qaadanayey Wakiillo ka socday shirkaddaha iyo daneyayaasha kale ee mashaariicda la xidhiidha saddexda aag isku-xidhkooda kulanka loo qabtay, waxaanay soo dhaweeyeen deddaalka ay wasaaraddu gelisay madashaasi, iyagoo tilmaamay inay ka faa'idaysteen xog iyo afkaar wax ku ool ah.

Shirkaasi oo labada maalmood ee u socday diirrada lagu saaray arrimo badan, waxa soo xidhay Agaasimaha guud ee Wasaaradda Md. Maxamed Cismaan Siciid oo kula dardaarmay ka qaybgaleyaaasha inay ku camal-falaan qodobadii laysla gorfeeyey ee gaawaha loo cullay.

Jamhuuriyadda Somaliland ayaa tacab iyo xoog badan gelisay sanadihii u dambeeyey horumarinta ka faa'idaysiga Khayraadka dalka ee dihin iyo abuurida illo tamarreed oo laysku halayn karo, taasoo laga dhalinayo tamarta la cusboonaysiiyo, waxaana jira daneyayaal faro badan oo ku soo hirtay maalin-gelinta macdanta, Shidaalka iyo tamartaba.



DAAHFURKA QORSHAHA ISTARAATAJIYADDA SHANTA SANO EE WASAARADA TAMARTA IYO MACDANTA SOMALILAND



Wasaarada Macdanta iyo Tamarta oo yeelatay markii u horaysay qorshaha shanta sano.

Hargeysa-Munaasibad lagu daahfurayey qorshaha Istaraatajiyadeed ee shanta sano ee soo socda ee Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Somaliland ayaa waxa ka soo qaybgalay Wasiirka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Somaliland iyo sidoo kale agaasimaha guud ee Wasaarada macdanta iyo tamarta Somaliland.



Ugu horayn waxa kulankaasi ka hadlay Agaasimaha guud ee Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Somaliland Mudane Maxamed Cismaan Siciid (Maxamed Soomaali), waxaanu yidhi “Maanta waxaynu joognaa qorshaha shanta sanadood ee wasaarada macdanta iyo tamarta somaliland, farxad weyn ayay noo tahay in la daahfuro qorshaha shanta sanadood, kaas oo muujinaya halka ay wasaaradu u socoto iyo

yoolka la doonayo in laga gaadho shaqada wasaaraddu ay qaranka u hayso shanta sanadood ee soo socota.

Runtii hawshan aynu maanta daahfurkeeda joogno waxa in badan ka soo shaqeeyey agaasimayaashii guud ee hore ee Wasaaradda iiga horeeyey, iyadoo hawshu ay gabogabo tahay ayuu illaahay ila kulmiyey. Intii danbe ayaanu dedaal farabadan galinay, waxaan aad iyo aad ugu amaanayaa intii ka soo qayb qaadatay hawshan aynu maanta daahfurkeeda joogno oo runtii ay ugu horayso waaxda qorshaynta,” ayuu yidhi Agaasimaha guud ee Wasaarada Macdana iyo tamarta Somaliland Maxamed Cismaan Siciid.



Wasiir ku xigeenka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Somaliland Siciid Axmed Jibriil oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa yidhi “waxa aynu maanta joognaa halkay u socotaa Wasaarada



Macdanta Tamarta iyo Shidaalka Somaliland, Sidoo kale waajibaadka ay qaranka uga masuulka tahay iyo halkay u socoto shanta sano ee soo socda waxa dedaal badan la galiyey buugaasi oo lagu soo ururiyey.

Marar badan waxa dhacda in documents qurux badan inta la qoro la dhigo uun khaanadaha oo dib aan la isku waydiin, waliba qorshaha documentskan waxa laga soo dheegay oo lagu saleeyey Qorshaha horumarinta qaranka (NDP), Markaa anigu dhinaca aan ka eegayaa waxa ay tahay waa inaynu xooga saarnaa mudada aynu masuulka ka nahay oo ku xisaabtanaa Si cidii inaga dambaysaa iyo cidii iman doonta Wasaarada iyo shantaa sano dabadeed in la yidhaahdo waxaasina way qabsoomeen waxaasina way ka hadhsan yihiin qorshihii shanta sano ee la diyaariyey. 'ayuu yidhi Wasiirka ku xigeenka Wasaarada macdanta iyo tamarta Somaliland.

Dhinaca kale Wasiirka macdanta iyo tamarta Somaliland Cabdilaahi Faarax Cabdi oo isaguna halkaasi ka hadlay ayaa waxa uu yidhi "Sidaad ogtihiin wasaaraddu saddex waaxood ayay ka shaqaysaa oo kala ah Patroolka, Macdanta iyo Tamarta, saddexduba waxa weeyi dhaqaalaha Waddanka halka laga korin karo. Tamartu waa muhiim oo waddanku hadaanu lahayn tamar uu ku shaqeeyo oo guryaha lagu shito, wax lagu barto, waddanku horumari mayo, wasaaradu way ogtahay arintaasi qorshahana way noogu jirtaa inta itaalkayaga ah waanu ku dedaalaynaa.

Dhinaca macdanta inoomay iman shirkado waaweyn oo maalgashada ama inaga caawiya maynaan helin, balse dalkeena macdantii way ku jirtaa oo dadkeenii buurihii way fuushan yihiin oo dhagax walba way qaadayaan, markaa waa in aynu ka bilawnaa sidii aynu dadka ugu diyaarin lahayn ee kuwaa miiga ee majarafada iyo madaraqa sita aynu u cilmiyey lahayn,

Sida kuwaa xoolaha ka dhoofinaya dekada in dadkeena buuraha fuushan wax la baro oo qalabkoodana kor loo qaado oo la nidaamiyo si dhaqaalahooda kor loogu qaado," ayuu yidhi Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Somaliland mudane Cabdilaahi Faarax Cabdi.



Wasaarada Macdanta iyo Tamarta oo yeelatay markii u horaysay qorshaha shanta sano.

WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA SOMALILAND OO MADAL KU SHAACISAY DHAQANGALINTA SIYAASADA MACDANTA



Hargeysa- Wasaaradda Macdanta Iyo Tamarta Somaliland ayaa Magaalada Hargeysa ku qabtay kulanka shaacinta iyo dhaqangalinta Siyaasada Macdanta Somaliland.

Kulankan oo ay ka soo qaybgaleen masuuliyiin kala duwan oo ka socda hay'addaha dawlada Somaliland ayaa waxa ugu horayn halkaasi ka hadlay Agaasimaha guud ee Wasaarada Tamarta Iyo Macdanta Somaliland Mudane Maxamed Cismaan Siciid (Maxamed Soomaali), kaas oo faahfaahin ka bixiyey muhiimada uu leeyahay kulankani iyo faa'iidooyinka uu qaranku ka dhaxli doono.



Agaasimaha Guud Ayaa idhi “Siyaasada macdanta ee Maanta halkan lagu daahfurayo waxaa digreeto ku dhaqan galiyey wasiirka

Tamarta Iyo Macdanta imika wixii ka dambeeyana waa dhaqan gal, waxay runtii taabanaysaa meelo farabadan oo ay ka duulaysaa, aasaasna u ah qorshaha horumarinta Qaranka ee saddexaad ayay waafaqsan tahay.

Sidoo kale waxa ay ku qotontaa hiigsiga uu qaranku ka leeyahay dhinaca Macdan qodista ee Somaliland National Vision 2030. Waxaanay runtii siyaasadani ay dhiirigalinaysaa in si siman looga faa'iidaysto khayraadka macdanta waddanka oo runtii wadankeena ay maanta macdan aad u farabadani ay ku duugan tahay in si siman looga faa'iidaysto.



In hadii ay tahay kobcinta Macdanta iyo kor u qaadista dhaqaalaha waddanka si siman looga faa'iidaysto, waxaanay dhiirigalinaysaa





siyaasadan macdantu bulshada iyo maalgashadayaasha” ayuu yidhi Agaasimaha Wasaarada Macdanta iyo Tamarta Somaliland.

Sidoo kale waxa isaguna halkaasi ka hadlay Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Somaliland, Cabdilaahi Faarax Cabdi, waxaanu yidhi “Shirkadaha Waxaan u sheegayaa inta aan meeshaasi joogo waxaan idiin balan qadayaa inaan wax eexasho ah iyo wax musuq ah aan la idiin keenin, idinkuna haday liisanka tahay iyo haday cashuurta tahayba aanu ku xisaabtano oo yaanay buuruhu inaga noqonin sida jagooyinkan ku wareegsan magaalooyinka.

Liisanbaan u qaatay oo waligayba waan haysanayaa oo cidbaan la doondoonyaa aan ka iibiyo, sharcigu caynkaa maaha, liisankuna maaha mulkiyad oo qofku xaqbuu u leeyahay inuu maalgashado oo nabadgalyadiisa la ilaaliyo oo uu ka shaqaysto, hadii uu ka shaqaysan kari waayo liisankana ha iska soo celiyo. Hadii kale waxa ay noqonaysaa inaynu Congo oo kale noqono.

Dawladda xaqbaa loogu leeyahay in ay koriso oo ay kobciso shirkadaha oo ay samayso maalgashi intii suurtagal ah, inkastoo ictiraafka ay wax badani inagaga maqan yihiin oo waliba ku saabsan dhinaca maalgashiga.” Ayuu yidhi Wasiirka Macdanta iyo Tamarta Jamhuuriyada Somaliland, mudane Cabdilaahi Faarax Cabdi .



KULANKA XOG-KAYDINTA LIISAMADDA.



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay weheliyaan Wasiir ku xigeenka Wasaaradda iyo Agaasimaha guud ee wasaaradda ayaa daah-furey Kulanka xog-kaydinta liisamadda.

Kulankan ay goob joog ahayeen Dhamaanba Shirkadaha Macdanta, Sidoo kale waxa kulanka ka soo qayb galay Agaasimayaasha Guud Ee wasaaradaha Arimaha Dibadda, Xanaanadda Xoolaha iyo Komishanka Tamarta



DIB U EEGISTA WAAJIBAADKA SHAQO EE KOMISHANKA TAMARTA



Waxaa hoolka shirarka ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ka qabsoomay Shir, shirkaaso lagu soo jeediyey warbixinta qiimayn iyo dib-u eegis lagu sameeyey waajibaadka shaqo ee Komiishanka Tamarta Soomaaliland. Shirka waxaa ka soo qayb galay Madaxda sare ee WMT, KTS iyo shaqaalaha mashruuca WB uu ugu horeeyo (ESWG). Warbixintan oo ay diyaarisay Amal Suleiman, ahla la taliyaha Shaqo Shaqaale Baanka Aduunka ee KTS. Waxaa si qoto dheer qiimayn loogu sameeyey waajibaadka KTS, maamulka iyo doorka isku xidhka aaga tamarta

korontada ee Somaliland, iyada oo diiradda la saarayo waajibaadka saran Komiishanka iyo Wasaarada, labadaba.

Natiijadu waxay iftiimisay baahida loo qabo xoojinta wada shaqaynta labadan hay'adood si kor loogu qaado horumarinta tamarta Somaliland. Kulankan oo ay ka soo qayb galeen maamulka sare iyo shaqaalaha labada SEC, Wasaaradda iyo Shaqaalaha Mashruuca WB oo uu hogaaminayo Wasiirka Tamarta iyo Macdanta, ayaa tilmaamay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dhinaca xoojinta maamulka iyo isku-xidhka qaybaha tamarta.



KOOXDA PIU-DA IYO AGAASIMAHA GUUD OO KA WARBIXIYEEY MASHRUUCA SESRP



Wasiirka wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax Cabdi oo uu weheliyo Agaasimaha guud ee Wasaaradda Md. Maxamed cismaan siciid ayaa kulan la yeeshay PIU-ga mashruuca SESRP ee uu banka Adduunku ku kumaalgelinaayo dib u habaynta korontada dalka 06/07/2024.

Shirkan ayaa warbixinno lagaga dhegaystay PIU-ga iyo Agaasimaha guud oo hogaaminaya barmaamujkan.

Warbixintan oo ku saabsanayd natiijada kulamo soo socday oo ay kooxda banka Adduunka, PIU ga iyo wasaaraddu wada yeeshen, kuuwaasoo dib u eegis lagu samaynaayey waxqabadyada la gaadhay 6dii biloodkii hore ee sanadkan iyo wixii carqalado jira.

Shirkan ayaa waxa lagu guddoonsaday in hawluhu si fiican u socdaan, waxaana dhinacyada lagula dardaarmay inay dardar-geliyaan shaqada.



KULANKA LAFO-GURKA XEER-NIDAAMIYAHA RUQSADAHA IYO TACRIIFADA KORANTADA



Wasiirka wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay weheliyaan Guddoomiyaha Komishanka Tamarta Qaranka Md. Xasan Sh. Maxamuud iyo Agaasimaha guud ee komishanka Tamarta ayaa daah-furay kulan wadatashi ah oo xeer-nidaamiyayaasha Ruqsadaha iyo tacriifada korontada Dalka lagu faaqidayo.

Kulankani oo muhiim u ah nidaaminta Aagga Tamarta Korontada wadanka waxa uu qayb wayn ka yahay Qorshaha Horumarinta Tamarta Korontada wadanka, waxaana ka qaybgaleyaashu ku faaqideen intii uu socday hanaanka iyo maamulka bixinta ruqsadaha iyo tacriifada adeegga Korantada.

Shirkan oo furmay ayaa waxa gunnaanadkiisii ka soo baxay qodobo muhiima.



KULANKA AGAASIMAHA GUUD IYO DANAYAYAASHA TAMARTA HARGEYSA



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cismaan Siciid oo ay wehelinayeen, Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud ee Komishanka Tamarta, Agaasimaha Waaxda Tamarta, Madaxa iyo Saraakiisha Mashruuca Bangiga Adduunka, ayaa la kulmay Madaxda iyo Saraakiisha Shirkadaha Tamarta ee Hargeysa 25/7/2024.

Kulanka ayaa ka dhacay Hoolka Wasaaradda, waxaana goob-joog ka ahaa Wakiillo ka socday Shirkaddaha kala duwan ee bixiya adeegga Laydhka Hargeysa.

Waxa shirkan la iskaga xaal waraysanayey hawlaha taagan iyo sidii loo dardar-gelin lahaa Tamarta Magaalada Hargeysa, waxaanu ku dhamaaday is-afgarad iyo guul.



DARDAR GELINTA MASHRUUCA BAANKA ADUUNKA



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta oy weheliyaan Wasiir ku xigeenka Wasaaradda iyo Agaasimaha guud ee WT&M Mohamed Osman Siciid ayaa kulan Dar-dar gelinta shaqadda la qaatay Unugga fulinta ee mashruuca banka adduunku ku maalgelinaayo korontada dalka.

Unuggan fulinta mashruuca oo hoos yimaadda wasaaradda Tamarka iyo Macdanta, gaar ahaanna laga maamulo xafiiska agaasimaha guud ayaa u jeedka kulankan ahaa

Qorshihii ka so baxay kulankii lala galay banka Aduunka sidii loogu badali lahaa shaqo la taaban karo.

Sidoo kale Madaxda wasaaradda ayaa kula dardaarmay in la dardar geliyo shaqada si maalgashigani dalka uu u galo bulshaduna uga Faa'ido.



KULANKA WADA-TASHIGA TAMARTA LA CUSBOONAYSIYO



Wasiirka Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax cabdi oo uu weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maxamed Cismaan Siciid ayaa furay kulanka wadatashiga iyo shirkadaha Tamarta cusboonaata 29/05/2024.

Kulankan ayay u jeedadiisu ahayd sidii loo dardar galin lahaa shaqada Tamarta cusboonaata iyo guud ahaan sidii layskugu xidhnaan lahaa.



DABA-GALKA ADEEGYADA CAAFIMAAD EE LOO FIDIYEEY BULSHADA KU DHAQAN GOBOLLADA SARAAR IYO TOGDHEER



Shaqaalaha Waaxda Shidaalka ee Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta JSL ayaa safar kormeer iyo dabagal ah ku tagay gobollada Togdheer & Saraar taariikhdu markay ahayd 25/04/2024, kaasoo ay ujadadiisu ahayd inay u kuur-galaan adeegyada caafimaad ee ay bixiyeen shirkadaha shiidaal baadhista ee Genel energy iyo CPC muddo 3 bilood ah oo deegaanada dhaca Block SL10B/13 ee gobolada Togdheer & Saraar ka hawlgelayeen.

Weftigan waxa hogaaminayey Madax-qeybkeedka Cilmiga dhulka ee waaxda Shiidaalka Siciid Cali, waxaanay kormeerreen 20 Degmo/tuulo oo dhaca Block SL10B/13, kuwaasoo loo qoondeeyay inay muddo 4 bilood ah helaan adeega caafimaad oo wareegga.

Deegaamada ayaa ugu qaybsan labada Gobol 14 Degmo/tuulo oo ka tirsan gobolka Togdheer iyo 6 Degmo/tuulo oo ka tirsan Gobolka Saraar.

Adeega caafimaad ee ay ku bixiyeen kharashaadkiisa Genel energy iyo CPC oo ay fulinaysaynaa hay' adda Shifaat ayaa ujadadiisu ahayd in deeganada laga sahaminaayo shidaalka laga fuliyo adeegyo bulshada loogu talo galay,

kaasoo ila hada loo fidiyey dad kor uu dhaafaya 10 kun oo qof.

Ugu danbayntii saraakiisha kormeerka iyo indho-indhaynta kusoo maray deegaanada ay ka socdaan adeega caafimaad ayaa la kulmey gudoomiyayaasha iyo dhamaan bulshada ka faaidaysaytay adeegan si ay u ogaadaan qaabka looga faa'iideystay iyo hadii ay jiraan caqabado ama cabashooyin ku gedaaman si kor looga sii qaado halka uu joogo.



WASIIRKA OO KALMAD DHIIRI GELIN AH KA JEEDIYEEY BOOK FAIRKA HARGAYSA



Wasiirka Wasaaradda Tamarta Iyo Macdanta oo uu Weheliyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda ayaa Xalay kalmado ka jeediyey Bandhiga Buugaagta Hargaysa.

Agaasimaha Guud oo hadalka qaatay ayaa idhi Hadii Aad doonaysaan inaad wadankiina horumar gaadhsiisaan waxaad barataan Khayraadka Wadankiina.

Wasiirka oo isaguna Halkaa ka hadlay wuxuu Awooda saaray Faa'idada akhriska wuxuuna dhiiri geliyey in dhalinyaradu akhriska badiyaan, Si horumar weyn aynu ugu talaabsano qaran ahaan.




KULANKA IBO-FURKA ISKAASHIGA SOMALILAND IYO DENMARK TAMARTA IYO MACDANTA



Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Maxamed Cismaan Siciid oo ay weheliyaan La-taliyaha Wasiirka Mudane Ibrahim Yusuf Ali iyo Agaasimaha waaxda Macdanta ayaa ku qaabilay xafiiskiisa Lataliyaha Maamulka ee Safaaradda Denmark ee Nairobi. Mr. Jens-Peter Dyrbak 25/7/2024, kaasoo ay halkaasi ku yeeshen kulan lagu gorfeeyey fursadaha maalgashi ee somaliland yaalla dhinacyada Tamarta iyo Macdanta.

Shirkan oo uu diyaarintiisa hormuud u ahaa la-taliyaha Wasiirku ayaa waxa ay labada dhinac kaga wada hadleen sidii loo abuurilahaa iskaashi laba geesood ah oo ku saabsan arrimaha kulanka lagu lafo-guray.

Arrintan ayaa qayb ka ah deddaallada ay Wasaaradda Tamarta iyo macdanta Jamhuuriyadda Somaliland ugu jirto sidii loo horumarin lahaa kaabeyaasha ka faa'idaysiga Khayraadka dalka.



WASIIR KU-XIGEENKA WASAARADDA OO QAABILEY WEFTI MAALGASHADEYAAL AH OO KA SOCDA SHIRKADDA KILOMASS



Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md Siciid Axmed Jibriil oo uu weheliyo Agaasimaha guud ee wasaaradda Md Maxamed Cismaan Siciid ayaa ku qaabilay hoollka wasaaradda shirkad maalgashi oo Magaceeda la yidhaahdo KILOMASS oo danaynaysa inay maalgashi ku sameeyaan Macdanta kala duwan ee dalka.



Wefti ka socda Shirkaddaasi ayaa kulan kula yeeshay Wasiir ku-xigeenka iyo Agaasimaha guud xarunta Wasaaradda ee Magaalada Hargeysa.

Wasiirka iyo Agaasimaha guud soo dhaweyn kaddib, waxa ay weftiga uga xog warameen macdanta kala duwan ee dalkeena ku duuggan, noocyaddeeda iyo nidaamka ay dawladdu u maamusho maalgashiga Khayraadka dabeeciga ah.

Masuuliyiinta ka socday Shirkadda KILOMASS, ayaa dhankooda uga mahad-naqay madaxda wasaaradda sida diirran ee ay u soo dhaweeyeen,



MASHRUUCA DIB-U-HABEYNTA MACDAN QODAYAASHA YAR YAR



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Maxamed Cismaan Siciid ayaa shir-gudoomiyey kulan farsamo oo ay soo qabanqaabiyeen waaxyaha macdanta iyo qorshaynta Wasaaraddu 17/7/2024.

Shirkan ayaa lagu gorfeyey soo jeedin mashruuc diiradda lagu saarayay sidii laysugu habayn-lahaa la iskuguna dubbaridilahaa macdan qodayaasha-garab rarratada ah (Artisenal Miners) ee soo koraya oo ku badanaya dalka.



Qorshaha mashruucan ayaa waxa uu la xidhiidhay caqabadaha soo noq-noqda ee qodaalka qaybtan waxaana ka mid ah tallaabooyinka sida rasmiga ah mashruucan wax loogaga qabanaayo:



Waxa kale oo mashruucani soo jeediyey in la sameeyo goobo macdan qodis ah oo ay dawladdu maamusho si loogu soo bandhigo cashuuraha iyo dakhli-soo-saarka ku habboon dawladda Somaliland, iyada oo looga gol-leeyahay in bulshada deegaanka loo abuuro saamayn bulsho oo wanaagsan, kaasoo waxbadan ka qabta bedbaadada deegaanka.

WASIIR KU XIGEENKA WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA AYAA KULAN WACYI-GELINNA KA DAAH-FURAY MAGALADDA CEERIGAABO.



Wasiir ku xigeenka Wasaarada Tamarta iyo Macdanta Somaliland Md Siciid Axmed Jibriil, ayaa Magaaladda Ceerigaabo ka daah furay kulan wada tashi oo lagaga hadlaayay maal gashiga Macdanta dalka iyo wacyi gelinta bulshada ku nool daagaanada macdanta laga qodo ee gobolka Sanaag ,

Kulan kaas oo ay goobjoog ka ahaayeen Siciid Axmed Jibriil oo ay weheliyaan Gudoomiyaha Gobolka Sanaag, Duqa Magaaladda Ceerigaabo, gudoomiyaha Degmada Maydh, Xildhibaano ka tirsan Golaha Wakiilada oo ka soo jeeda Gobolka Sanaag , Guddiga Nabad gelyadda Gobolka iyo Salaadiinta, Cuqaasha, Waxgaradka deegaanada hodalka ku ah khayraadka Macdanta .



SHIRKII AGAASIMAHA GUUD IYO AGAASIMAYAASHA WAAXAHA



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Maxamed Cismaan siciid ayaa maanta gudoominayey shirka maamulka iyo Agaasimayaasha waaxaha.

Shirkan oo ah mid todobaadle ah ayaa waxaa ay Madaxda iyo maamulka Wasaaraddu ay ku wadaagaan hawlaha shaqo ee ay wasaaraddu gacanta ku hayso, waxaana wax layska waydiiyaa shaqooyinka qorshaysan, kuwa qabsoomay iyo sidii loo joogtayn lahaa isla markaana loo gaadhi lahaa hiigsiga iyo himilooyinka u dejisan Wasaaradda.

Intii uu kulanku socdayna waxay Agaasimayaasha Waaxuhu ku soo bandhigeen Shaqooyinka qabsoomay, kuwa qorshaysan iyo sidii qorshayaashaas loogu fulin lahaa wakhtigooda.

Ugu dambayna agaasimaha guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cismaan Siciid ayaa uga mahad celiyey agaasimayaasha shaqada fiican ee ay u hayaan wasaaradda waxaana uu ku booriyey inay shaqo kasta kusoo dhameeyaan wakhtiga loogu talo galay, Maadama 6 biloodkii hore dhamaad ku dhowyahay.



SHIRKA SHAQAALAHA WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA



02/06/2024 waxa ay Waaxda Shaqaalaha ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta soo qabanqaabisay Shirka bilaha ahaa ee shaqaaleweynaha Wasaaradda, kaasoo ka qabsoomay hoolka shirarka ee Xarunta wasaaradda.

Shirka oo uu Gudoominayey Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta iyo Agaasimaya guud ee wasaaraddu ayaa waxa ka qayb galay dhamaan Maamulka, Madaxda iyo shaqaalaha Wasaaradda.



Agaasimaha Guud ee wasaaradda Md. Maxamed Cismaan Siciid oo kulanka furay ayaa Shaqaalaha uga Jeediyey hadal dheer oo dhiiri gelin, Dardaaran iyo Awaamiir isugu jira, kuna tacaluqa gudashada xilka iyo waajibaadkooda shaqo.



Ugu danbayn waxaa kulanka soo xidhay wasiir ku xigeenka Wasaaradda Md Siciid Axmed Jibriil, waxaanu shaqaalaha kula dardaarmay in ay ilaaliyaan wakhtiga shaqadda iyo masuuliyadda ka saaran u adeeggida qaranka

XAFLADA ABAALMARINTA SHAQAALAHA WASAARADDA TAMARTA IYO MACDANTA JSL EE SANADKII 2023



Abaal-marinta sanadlaha ee Shaqaalaha Wasaaraddu waa mid kamida talaabooyinka lagu dhiiri-gelinayo shaqaalaha, taasoo ku timaada qiimeyn lagu sameeyo shaqaalaha, isla markaana lagu abaal-mariyo xubnaha ugu shaqada wanaagsan. Munaasibad abaalmarineed oo lagu gudoonsiiyey shaqaalaha ugu kartida iyo shaqada badnaa Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa ka qabsoontay Hotel Cali Jirde ee magaaladda Hargeysa 26.02.2023.

Xafladan ayaa ah mid sanadle ah oo had iyo jeer abaalmarino lagu gudoonsiiyo shaqaalaha u shaqada iyo kartida badan, taasoo ka mid ah horumarinta istaraatiijiyaddaha shaqada iyo shaqaalaha, lana fulinayo hab-raacyada iyo shuruucda u dajisan Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

Ugu horeyn waxa furitaankii munaasabada hadal ka jeediyey Agaasimaha waaxda shaqaalaha ee WT&M Axmed Maxamed Cumar oo hadal kooban ka jeediyay, ayaa faahfaahin ka bixiyey qaabka lagu soo xulay shaqaalaha lagu abaal-mariyey shaqo-wanaagga sanadlaha ah. Agaasimaha waaxda shaqaaluhu waxa uu sidoo kale sheegay in xubnaha la abaal-mariyey ay ka kooban yihiin 16 Qof "16-kaas qof, qof walba agaasime waxeedkiisa ayaa soo xulay kadib wasiirka iyo agaasimaha guud iyo gudi loo xilsaaray ayaa qiimeeyay markaas ayaa la egaa imanshihiisa shaqo, Si cadaaladda oo qof jeclaysi aan ahayn ayaa loo qiimeeyaa waxaan maanta aad ugu hambalyaynayaa dhaaman shaqaalaha kuwa aan gulaysanna waxaan leeyahay insha allah waxaan rajaynaa inaad sanadka danbe guulaysan doontaan"





Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo macdanta mudane Maxamed Cismaan Siciid, ayaa si qoto dheer uga waramay muhiimadda ay leedahay abaal-marinta shaqaaluhu, waxaanu cadeeyey inay shaqaale weynaha Wasaaraddu dhamaantood yihiin dad xilkasnimo iyo shaqo-wanaagga leh “waxaan qiraaya in shaqalaha ka hawlgala wasaaradani yihiin kuwa koobsadey hawlkarnimo, dadaal iyo daacadnimo ,mana kala dhacaan aqoontooda, Kartidoodda iyo waayo aragnimadda ay u leeyihiin Qof waliba Waaxda uu jooggo” Inta dadaashay waan u mahadcelinayaa inta kalana waxaan leeyahay guul baa inoo balanna”ayuu yidhi Agaasime Maxamed Cismaan Siciid.

macdantu waxay ka mid tahay wasaaradaha halbowlaha u ah Qaranka, waxaan shaqaalaha iyo madaxda wasaarada u soo jeedinayaa inay u guntadaan sidii ay Qaranka uga haqabtirilahaayeen khayraadka dihin ee Dalka ku duugan”.

Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Siciid Axmed Jibriil ayaa munaasibadan ka qiray deddaalka iyo firinfircoonida shaqaalaha ka hawlgala wasaaradda. Waxaanu yidhi “shaqalahani waxay kaalin firfircoon ka qaateen hawsha socodsiinta iyo deddaalada loogu jiro ka faa’idaysiga Tamarta, Macdanta iyo shiidaal baadhista Dalka ka socota iyagoo ururiyey kaydiyayna dhamaan macluumaadka iyo xogaha ku saabsan arrimaha ay wasaaraddu Qaranka masuulka uga tahay. Wasiirku waxa uu carabka ku adkeeyey inay guusha xubnaha la abaal-mariyey ay wada leeyihiin dhamaan shaqaale weynaha wasaarada Tamarta iyo macdanta somaliland.



Agaasimaha Guud ee Haayadda Shaqaalaha Khaalid Mire Nuur oo goob joog ka ahaa munaasibada ayaa dhankiisa bogaadiyey shaqaalaha muujiyey hawlkarnimada, waxaanu intaasi ku daray “wasaaradda Tamarta iyo





GUDDIDA DHAQAALAHA EE GOLAHA WASIIRRADA OO BOGAADIYEEY HORUMARINTA AAGGA TAMARTA



Shir lagaga arrinsanayey sidii loo Horumarin lahaa Aaga korontadda ee Jamhuuriyadda Somaliland ayaa ka qabsoomay xarunta Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta maalin Isniin ah 22-kii Bishii April 2024.

Shirkan waxa ka qayb-galay xubno ka mid ah Guddida Dhaqaalaha Golaha Wasiirrada Somaliland, Masuuliyiinta Wasaaradda Macdanta iyo Komishanka Tamarta Somaliland. Intuu shirku socday waxa lagu gorfeeyey sidii loo

horumarin lahaa Addeega Tamarta Korontada Dalka, Sidii bulshadu u heli lahayd Koronto Jaban oo ay awoodi karaan iyo sidii looga faa'iidsan lahaa Mucaawimooyinka Baanka Addunku ugu deeqay Somaliland, ee loogu talo-galay in lagu horumariyo addeega Korontada Somaliland.

Xubnaha guddida ayaa bogaadiyey shaqada Wasaaradda tamarta iyo Macdanta ee ku taxaluqda hawlaha horumarinta tamarta dalka iyo khayraadka kale.



AGAASIMEY AAL KA TIRSAN WASAARADDA OO KULAN LA YEESHAY ARDAYDA



Agaasimaha Waaxda Macdanta oo uu weheliyo Agaasimaha Xidhiidhka Dad weynaha iyo Saxaafadda Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa kulan is xog-waraysi la yeeshay Arday Kuliyadda Barashadda Cilmiga dhulka ee Jaamacadda Gollis.

Masuuliyiinta ayaa xog dheeraad ah ka siiyey Ardayda khayraadka iyo cilmiga ku duuggan dhulkeena.



WEFTI KA SOCDA SHIRKAD SWEDEN LAGA LEEYAHAY OO BOOQASHO XAQIIQO-RAADIN AH KU YIMI DALKA



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cusmaan Siciid ayaa ku qaabilay hoolka shirarka ee wasaaradda Madax ka socota Company laga leeyahay Dalka Sweden oo magaciisa la yidhaahdo SWECO 16-kii bishii June ee sanadka.

Weftigan reer Sweden oo ay weheliyeen xubno kamida qurbo-joog reer somaliland ee dalkaas ku dhaqan iyo Agaasimaha hay'adda Maxaliga ah ee

Havayoco, ayaa ujeedada booqashadoodu ahayd inay wax ka ogaadaan fursadaha maalgashiga Tamarta lacusboonaysiin karo ee yaalla dalka, waxaanay si gaar ah xog uga rabeen Tamarta laga dhaliyo cadceedda iyo dabaysha.

Md. Maxamed Osmaan Siciid Agaasimaha guud ee Wasaaradda macdanta iyo tamarta ayaa weftigan faahfaahin ka siiyey noocyada tamarta ee waddankeenu leeyahay iyo fursadaha ku jira.



TURJUMAADA XEERNIDAAMIYAYAASHA MACDANTA SOMALILAND.



Wasiir ka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Abdilahi Faarax Abdi oo ay waheliyaan Wasiir Ku xigeenka wasaaradda tamarta iyo macdanta Siciid Axmed Jibriil iyo Agaasimaha Guud Maxamed Cusmaan Saciid ayaa daahfuray kulanka Dib u eegista yo Turjumaada Xeernidaamiyayaasha Macdanta Soomaliland oo Hawshiisu maanta la daahfuray, kuwaas oo ka kooban 19-Xeernidaamiye oo ka faracmaya Xeerka macdanta Somaliland Xeer-Lr-100/2023. Kulankaas Waxaaa Goob joog ahaa a Agaasimaha Waaxda Qorsheenta, Xafiiska Shuruuca,

Agaasime Kuxigeenka Waaxda Macdanta, Shaqaalaha Waaxda macdanta iyo Lataliyaasha Arimaha macdanta Ee wasaaradda tamarta iyo macdanta.

Madaxda Wasaarada Waxaa ay si qoto dheer uga warbixiyeen muhiimada ay u leedahay dalka in xeerarka iyo shuruucdaba la dhamaystiro, si ay Maalgashiga Shisheeye ay ugu soo hirtaan maalgashiga macdanta wadankeena hodanka ku ah.



WASAARADDA OO TURJUMAYSA SHAN XEER-NIDAAMIYE LA XIDHIIDHA SHIDAALKA



Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta JSL Md Siciid Axmed jibriil ayaa daahfuray kulanka Dib u habaynta iyo turjumaada Xeer-nidaamiyeyaasha Baadhista iyo Soosaarista Shidaalka oo socon doona muddo 6 bilood ah. Kulankan ayaa furmay 18/03/2024, waxaana lagu naaqishay shan xeer-nidaamiye oo kale ah:

1. National Content Upstream Petroleum Regulations
2. Data Resource Management Regulations
3. HSE Upstream Petroleum Regulations
4. Upstream Petroleum Measurements Regulations
5. General Upstream Petroleum Regulations

kulankaasi intii uu socday waxa goob-joog ka ahaa Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Siciid Axmed Jibriil , la taliyayaasha farsamo ee Arimaha shidaalka Siciid M. Dhamac, Eng. Maxamud Jamac (Jabali), Agaasimaha Waaxda Qorshaynta, Agaasimaha Waaxda Shidaalka iyo injineero ka tirsan Waaxda Shidaalka.

Agaasimaha waaxda Shidaalka ayaa ka warbixiyey ahmiyadda ay leedahay dib-u-habaynta iyo turjumaada xeer-nidamiyayaashan, taasi oo ka qayb qaadanaysa so jiidashada maalgashiga dhinaca khayraad, dabeeciga ah sida baadhista iyo soo-saarka shidaalka, sidoo kale la-xisaabtanka shirkaddaha heshiisyada dawlada kula jira.

Sidoo kale waxa talooyin soo jeediyay labada khabiir Eng Siciid Dhamac iyo Eng Maxamud Jabali, kuwaasoo ku dheeraday sida ay u muhiimsantahay in la dhiso shuruucda iyo xeerarka shidaalka dalka.

Shirkan waxa soo xidhay Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Siciid Axmed Jibriil isaga oo si qoto dheer uga hadlay muhiimada ay u leedahay dalka in shuruucda la dhamaystiro, taasoo uu tilmaamay inay dhiirigelinayso inay maalgashadeyaasha shisheeye ku soo hiran karaan dalkeena.

Wasiirka ayaa ku adkeeyey injineerada iyo khabarada mudada 6 bilood ku diyaarin doona xeer-nidaamiyayaashan inay guntiga dhiisha iskaga dhigaan sidii hawshaasi ay u guulaysan lahayd.



MADAXDA WASAARADDA, AYAA LA KULMEY SHIRKADHA SOOSAARA MACDANTA JADE KA EE LAGA QODO DEGMADA FIQI-AYUUB



Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md: Siciid Axmed Jibriil iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Md: Maxamed Cismaan Siciid oo ay weheliyaan Agaasimaha Waaxda Macdanta iyo Shaqaale weynaha waaxda Macdanta ee wasaaradda, ayaa la kulmey shirkadaha soosaara macdanta Jade ka ee laga qodo Degmada Fiqi-ayyub ee Gobolka Togdheer. Kulankaasi oo daba socday kormeer ay

wasaaraddu dhawaan ku samaysay goobaha macdanta laga qodo ee gobolka Togdheer. Haddaba, kulankan waxaa uu daaranaa is xog-waraysiga shirkadaha qoda Jade ka sidii loo dardargelin lahaa loogana shaqaysiinlahaa. Sidoo kale waxaa shirkadaha laga dhegaystay warbixinta hawlaha mashruuca iyo caqabadaha ku gedaaman.



AGAB WAX BARASHO



Sidaan ka warqabno ardayda iskuulada Soomaaliland waxaa ay qabaan baahiyo farabadan oo ay tahay dhamaan in laga wada qayb qaato sidii wax looga qaban lahaa. Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta oo uu matalayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maxamed Cismaan Siciid oo ay weheliyaan Agaasimaha Shidaalka iyo shirkadda GENEL ENERGY waxay gaadhsiiyeen deeq agab waxbarsho Kun Arday oo dhigta afar iskuul oo ku kala yaala magaaloyinka Baligubadle, Salaxley, Sabawanaag iyo Oodweyne kana tirsan Oodweyne Block.

250 kii Arday ee u horeeyeyna Maanta ayaa Agabkaa la gaadhsiiyey.



SOO DHAWAYNTA AGAASIMAHA GUUD



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Siciid Axmed jibriil, Isuduwaha Kooxda Aaga Tamarta korontada Somaliland Ahmed cali Ubaxle, Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaale weynaha wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa kulan soo dhaweyn ah u sameeyey Agaasimaha Guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cismaan Siciid oo dhawaan xilka la wareegay.

Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Siciid Axmed Jibriil oo kulanka soo dhawaynta ah furay ayaa uga war bixiyey Agaasimaha guud wasaaradda iyo shaqadda ay qabato iyo in wasaaraddu Qaranka masuul uga tahay saddex tiir oo muhiima, kuwaasoo kala ah Tamarta, Macdanta iyo shidaalka.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Maxamed Siciid Cismaan (Maxamed Soomaali) ayaa isaguna ka mahad

celiyey soo dhawaynta wanaagsan ee Wasiirrada, Agaasimayaasha waaxaha iyo shaqaalaha wasaaraduba ku qaabileen, sidoo kalena xusay mudadii uu joogay wasaaradda sida wanaagsan ee shaqaaluhu wakhtiga shaqada u ilaalinayaan diyaarna u yihiin in ay ka midha dhaliyaan shaqada wasaaradu qaranka masuul uga tahay.

Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane Cabdilaahi faarax Cabdi oo kulanka soo xidhay ayaa Agaasimaha guud ku amaanay Dedaalka uu wado iyo in Agaasimaha Guud yahay nin dhalinyaro ah oo aqoon duruqsan u leh arrimaha maalgashiga, Wasaaraduna ay u baahan tahay in maalgashi weyn u hesho Tamarta, Macdanta iyo Shidaalka.

Wasiirka Wasaaradda ayaa xusay in shaqaalaha wasaaraddu ay yihiin shaqaale farsamo yaqaano u badan, kuwaasoo garanaya shaqadda uu qof waliba masuulka ka yahay.



DIB U EEGISTA QORSHE SANADEEDKA 2023 EE WASARADDA



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay weheliyaan Wasiir-ku-xigeenka Wasaaradda Md. Siciid Axmed Jibriil iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Md. Maxamed Cismaan Siciid ayaa furay Kulanka qiimaynta iyo dib-u-eegista qorshe-sanadeedka Wasaaradda 2023.



Kulankan ayaa lagu lafo-guray waxyaabihii ka qabsoomay Qorshaha Wasaaradda ee sanadka sii dhaamanaya ee 2023, waxaana loogu gogol-xaadhayaa sameynta qorshaha sanadka soo socda ee 2024. Masuuliyiinta wasaaradda ayaa ku dheeraaday ahmiyadda ay leedahay dejinta qorsheyaasha hawleed ee Wasaaradda, kuwaasoo lagu jaan-goynayo qorshaha guud ee Qaranka.



AGAASIMAHA GUUD AYAA SOO XIDHAY SHIRKA DIYAARINTA QORSHAHA SANADKA 2024



30Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md. Maxamed Siciid Cismaan ayaa soo xidhay shirka Diyaarinta Qorshaha Sanadka 2024 ee ay ku shaqayn doonto Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.



Dhamaan Agaasimeyaasha, Madaxda Waaxaha iyo Xafiisyada Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa soo bandhigey qorshayaasha horumarineed ee Wasaarada Tamartu uga masuul tahay Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland.



MADAXDA WASAARADDA OO KULAN LA QAATAY MADAXDA U SARAYSA SHIRKADDA GENEL ENERGY



Galabta, Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ay weheliyaan wasiirku xigeenka iyo agaasimaha guud ee wasaaradda ayaa kulan la qaatay madaxda u saraysa Shirkadda Genel energy oo dalka ku yimid safar gaaban.

Kulankan ayaa genel Energy kusoo bandhigtay hawlqabadyada soo saarista shiidaalka SL10B/13 ee qorshe sanadeedka 2024.



WEFTI KA SOCDA KOONFUR AFRIKA OO U KUUR-GALAY TAMARTA IYO KHAYRAADKA SOMALILAND



Gudoomiyaha xisbiga Kulmiye ahna wasiirka Arimaha Gudaha Maxamed Kaahin Axmed, Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Somaliland Cabdilaahi Faarax Cabdi, Wasiir ku xigeenka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, Gudoomiyaha Komishanka korontadda, Agaasimaha guud ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, Safiirka South Africa u fadhiya somaliland iyo Agaasimaha komishanka Tamarta korontada ayaa xarunta Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ku soo dhaweyey 13/12/2024, Wefti ka socday Dalka Koonfur Afrika oo booqasho ku yimi Waddanka.

Maamulka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta ayaa la Wadaagay Warbixino la xiidhiidha Khayraadka Somaliland ku duugan ee dhanka Tamarta, Macdanta iyo shidaalka iyo fursaddaha maalgashi ee ka banaan.

Weftiga ayaa dhinacooda soo dhaweyey War bixinaha laga siiyey khayraadka Somaliland ku jira.

labada dal ee Somaliland iyo Koonfur Afrika ayaa iska kaashan doonna Horumarinta kaabeyaasha tamarta iyo Dhaqaalaha.



WEFTI KA SOCDA SHIRKADDA PIONEERS TRADE CENTER OO BOOQASHO KU YIMI DALKA



Wasiir ka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md. Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay weheliyaan Wasiir ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Md Maxamed Cismaan Siciid ayaa Xafiiska ku qaabilay Shirkadda Pioneers Trade Center oo ah shirkada Maalgashi balaadhan ku sameyn doonta Macdanta iyo Shidaalka Dalka 23/03/2024, taasoo ka hawlgasha Waddamo badan oo caalamka ah .

Madaxda Wasaaradda ayaa Waftiga uga warbixiyay fursadaha maalgashi ee dalka iyo meelaha ay danaynayaanba, waxaanay weftigu uga mahad-naqeen sida diirran ee ay u soo dhaweeyeen madaxda Wasaraddu, iyadoo intaasi ku daray inay qayb ka noqon doonaan maalgashiga mashaariicdan ay danaynayaan.



WASIIRKA TAMARTA IYO MACDANTA OO IMAARAADKA CARABTA KULA KULMAY MAALGASHADEYAAL



Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Mudane, Cadillaahi Faarax Cabdi iyo Lataliyihiisa gaarka ah Ibraahim Cali Yuusuf oo booqasho hawleed oo muhiima ku tegay dalka Isu-tagga Imaaraadka Carabta ayaa wada-hadallo la yeeshay Maal-gashadayaasha Tamarta 05/04/2024.

Weftiga Wasiirka waxa qasriga boqortooyada ku qaabilay Mudane Sheekh Saud bin Saqr al-Qasimi, oo ah Golaha Sare ee UAE Xubin ka tirsan, ahna Xaakimka Ras Al Khaimah.



KOOX KAMIDA SHAQAALHA WASAARADDA OO TABABAR KAGA QAYBGALAY TAIWAN IYO BOOQASHADII WASIIRKA EE DALKAAS



Agaasimaha Waaxda shidaalka Yuusuf Muuse, Agaasime ku xigeenka Waaxda iyo saddex injineer oo ka tirsan Waaxda Shidaalka ee Wasaaradda macdanta iyo tamarta ayaa kaga qayb-galay tababar dalka Taiwan 17/june /2024. Tababarkan oo ahaa mid muddo badan la sugaayay oo ay bixinaysay shirkadda shidaalka CPC ee laga leeyahay dalka Taiwan, ayaa socday mudo 10 cisho ah, waxaana lagu baranayey muwaadiic kala duwan oo khuuseeya baadhista iyo soo saarista shidaalka.

Tababarkan ayaa ku yimid iskaashi labada wasaaraddood ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta JSL iyo Wasaaradda Ganacsiga Taiwan, waxaanu ka turjumaya iskaashiga sareeyaa ee labada dal ka dhexeeya si labada dal ay isku weydaarsadaan aqoonta iyo waayo-aragnimada ka faa'idaysiga khayraadka dabeeciga ah.

Dhinaca kale, Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay wehelinayaan Lataliyihiisa gaarka ah Ibraahim Cali Yuusuf iyo Safiirka Somaliland ee dalka Taiwan ayaa 27 june 2024 kala qayb galay saraakiisha kor aynu xusnay booqosho ay ku tageen goob ka mid ah goobaha laga soo saaro Gaaska ee dalka Taiwan.





Dhinaca kale, Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Cabdilaahi Faarax Cabdi oo ay wehelinayaan Lataliyihiisa gaarka ah Ibraahim Cali Yuusuf iyo Safiirka Somaliland ee dalka Taiwan ayaa 27 june 2024 kala qayb galay saraakiisha kor aynu xusnay booqosho ay ku tageen goob ka mid ah goobaha laga soo saaro Gaaska ee dalka Taiwan. Sidoo kale Wasiirku waxa uu 28 june ka qayb galay xaflada qalinjabinta tababarki u socday Agaasimaha Waaxda Shidaalka, Agaasime ku-xigeenka waaxda iyo saddex Injineer oo ka tirsan waaxda Shidaalka ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.

Tababarka oo sida aan xusnay ay soo qaban qaabisay Shirkadda shidaalka ee CPC Taiwan, ayaa muddo laba todobaad ah waxa ay ku qateen ka qaybgaleyashu duruus la xidhiidha baadhista iyo soo saarista shidaalka (Oil and Gas exploration Training Program).

Wefti uu hogaaminayey Wasiirka Wasaaradda Tamarta & Macdanta JSL Mudane Cabdillahi Faarax Cabdi, waxa dalka Taiwan ku soo dhaweeyey Wakiilka Somaliland u fadhiya halkaasi Ambassador Dr-Maxamed xaaji, oo runtii ku qaabiley wasiirka iyo weftigiisa jawi wanaagsan isla markaana Wasiirka uga war bixiyey arrimaha iyo shaqada baaxada leh ee safaaradu u hayso bulshada reer Somaaliland ee ku dhaqan Taiwan iyo xidhiidhka wanaagsan ee ay Somaaliland la leenahay Taiwan.



SAFARKII UGANDA



Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Maxamed Cismaan Siciid oo ay weheliyaan Gudoomiyaha Komishanka Tamarta Hassan Sh. Mohamoud Suufi, Agaasimaha Guud ee Komiishanka Tamarta Mahamed Mohamoud Abdi iyo wefti ka kooban agaasime waaxeed oo isugu jira Wasaaradda tamarta iyo Macdanta iyo Komiishanka Tamarta

Sidoo kale Kulanka waxaa qayb ka ahaa Patrick Mwesige oo world bank ka kasocday iyo xubno ka socday world bank ka oo safar shaqo u jooga dalka Ugandha caasimadda Kambala ayaa maanta kulan kula qaatay Madaxda Hayadda Tamarta Dalka Uganda. (Uganda Electricity Regulatory Authority “ERA”). Kulankaas oo lagaga wada hadlay xaaladda korontada labada wadan iyo sidii looga wada shaqayn iskaashi dhinaca Tamarta ah.



AGAASIMAHA GUUD EEWASAARADDA AYAA XILKA U KALA WAREEJIYEY AGAASIMIHII HORE IYO AGAASIMAHA CUSUB.



Agaasimaha guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Md Maxamed Cisman Siciid ayaa xilalka u kala wareejiyey Agaasimaha Maamulka iyo Maaliyadda, Agaasime waxeed ku xigeenadda

iyo Madaxa baadhista gudaha ee wasaaradda Tamarta iyo Macdanta, oo dhawaan wasiirku magacaabay.



GUDDIDA MAAMUL (STEERING COMMITTEE)



Guddida maamul (Steering Committee) ee mashruuca Korontada banka adduunku ka maalgelinaayo Somaliland ayaa kulankoodii saddex biloodlaha ahaa saaka ku yeeshay xarunta wasaaradda tamarta iyo macdanta.

Kulanka waxa shir Gudoominayey Wasiirka Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta Waxaanna Goob joog ahaa.

- » Wasiir wasaaradda Horumarinta C a a f i m a a d k a
- » Wasiirka Wasaaradda Waxbarashadda.
- » Wasiir ku xigeenka Tamarta iyo Macdanta
- » Agaasimaha guud ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta
- » Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Degaanka.
- » Duqa Caasimadda Hargaysa
- » Agaasimaha Waaxda Tamarta iyo Shaqaalaha Mashruuca Banka Aduunka.



Kulankan ayaa lagu dersay halka uu mashruucu maraayo sidoo kalena lagu qiimeeyey wixii mashruuca u qabsoomay sanad kii dhamaaday isla-markaana hawlqabadka sanadkan cusub 2024 lagu ansixiyey.

Ciyaartooyadda kubadda cagta ee wasaaradda tamartha iyo macdanta.



Shaqaalaha Ka qayb galay Tartankii Kubadda Cagta.



Ciyaartooyadda Kubadda Basketka ee Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.





+252 63 422014
info.moem@govsomaliland.org
moem.govsomaliland.org

204, Abu Baker Al Siddiq Road,
Durya, 26-June, Hargeisa, 90602